ALLIANCE
ACTion
INFORMATION SHEETS

Fahamka Habka Waxbarashada Gaar ahaaneed

(Understanding the Special Education Process—Somali version)

Tusaalo guud oo waalidka loogu tala galay

Khariidadahan hoos ku qoran waa tusaaloyin guud oo na tusaya habka loo maro waxbarashada gaar ahaaneed. Ma ah'a mid lagu faah faahinayo talaabooyinka la qaato oo idil ama kuwo qeexan. Waxey na tusayaan habka iyo dariiqa loo maro marka ilmaha loo garto iney naafa leeyihiin oo ey u baahan yihiin qiimeeyn ill'aa marka loo samenynayo qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed (IEP).

Habka wuxuu billawdaa marka qof (sida shaqaalaha dugsiga, waalidka, iwm) ku taliyo in loo baahan yahay qiimeeynta ugu horeysa. Tiro walba oo khariidadda ah waxaa raacsan fasiraad.

Waalidka, Shaqaalaha degmada dugsiga ama dad kale oo codsada qiimeynta; waalidka oo aqbala iyadoo qoraal ah. (1)

Qiimeyntii oo la gabagabeeya. Go'aanka in ilmahu howlaha u qalmo. (2) → Uma qalmo. (3)

Waa u qalmaa howlaha. (4)

a) Qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed la sameeya
b) Meeleynta oo la isla garta (waxaa laga yabaa in labo kulan loo baahan yahay) (5) → Waalidka oo aqbali waaya. (6)

Waalidka waa aqbalay. (7)

Kulankii sanadeed ee waxbarashada gaar ahaaneed. (8) → Waalidka oo aqbali waaya. (9)

Waalidku waa aqbalay. (10)

Technical Assistance ALLIANCE for Parent Centers
8161 Normandale Blvd.
Minneapolis, MN 55437-1044
952.838.9000
952.838.0190 TTY
952.838.0199 fax
888.248.0822 National Toll-free
alliance@taalliance.org
www.taalliance.org

©2007 PACER Center | ALLIANCE ACTion Sheet: ALL-17so

Sida habku u shaqeeyo

1. Waalidka, shaqaalaha dugsiga, ardeyda iyo dad kaleba waa codsan karaan qiimeeynta. Hadii aad dugsiga ka codsato qiimeyn ah in ilmahaaga laga qiimeeyo wax dib u dhac ah oo ay baahan yihiin waxbarashada gaar ahaaneed, degmada dugsiga waa iney ku dhaqaaqdaa qiimeyn buuxda oo ilmahaa u qaas ah. Hadii degmadu diido iney ku dhaqaaqdo, waa iney ku siisaa ogeysiin haboon iyo talaabadaha aad xaqa u leedahay in aad ku dhaqaaqdo.

   Waa in lagu weydiiyaa ogolaansho iyadoo qoraal ah marka ugu horeysa ee qiimeynta la sameynayo iyo imtixaan walba ee ka mid ah qiimeyntaa.

2. Koox taqasus ah iyo adiga ayaa isla garanaya natiijyada ka soo baxday qiimeeynta iyo in ilmaha u qalmo howlaha waxbarashada gaar ahaaned.

3. Haduu ilmahaagu u qalmi waayo, sida ku haboon ayaa laguula socodsiinayaa, habkuna halkaa ayuu ku istaagayaa. Hase ahaatee, waxaad xaq u leedahay in aad ku raaci weydo natiijyada ka soo baxday qiimeynta ama go'aanka ah in uusan ilmahaagu u qalmin.

   Hadaad ku raaci weydo natiijyada qiimeeynta, waxaad xaq u leedahay qiimeeyn waxbarasho ee madax bannaan Independent Educational Evaluation (IEE). Qof ka madax bannaan dugsiga ayaa qiimeeyntaa gunnaanada. Dugsiga waa in uu bixiyaa lacagta ku kacda qiimeeyntaa madax bannaan ama uu tiigsadaa sharci habraac ah ee loo yaqaan (due process) oo dugsigu muujinayo in qiimeeyntii hore tahay mid ku haboon baahida ilmaha.

4. Hadaad adiga iyo degmada dugsiga isku raacdaan in ilmahaaga u qalmo howlaha, adiga iyo shaqaalaha dugsiga ayaa wada kulmaya si aad u falanqeysaan qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed (IEP)ee ilmaha. Waad u simantihiin kooxda. Goballadda qaarkood magac ka duwan ayaa kulankan loo yaqaan.

5. Qorshaha Waxbarashada gaar ahaaneed waxuu mid mid u qorayaa, howlaha u qaaska ah ilmahaaga ee uu u baahan yahay, natiijyada laga doonayo in ilmahaagu gaaro sanadka dhamaadkiisa iyo ulajeedada halka laga doonayo in uu gaaro. Kooxda waxey kaloo isla garaneysa howlaha loo baahanyahay iney qorshaha ka mid noqdaan, halka lagu qabanayo howlahaa iyo waxii hab doorin ah ee loo baahan yahay. Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa in hal kulan keliya lagu go'aamiyo qorshaha waxbarashada iyo meeleynta ilmaha. Marnna meeleynta kulan gooni ah ee loo yaqaan kulanka meeleynta (placement meeting) ayaa loo qabtaa.

   Ilmaha waa in lagu meeleeyaa halka ugu xad yar ee haqabtiri karta baahidooda Least Restrictive Invironment (LRE). Haddii aysan kooxdu isla garan in ardeygaa wax ku baran karin fasalka caadiga ah moyee.Waa in howlaha loogu fuliyaa fasalka arddada caadiga ah. Adiga waalidka ah waxaad ka mid tahay kooxda go'aanka ka gaareysa howsha iyo halka wax lagu barayo.

6. Haddii aad ku qanci weydo qorshaha loo dejiyey ama halka loogu fulinayo, waa in aad marka hore la xaajootaa kooxda si aad isula garataan. Haddaad weli ku qanci weydo, waxaad ku dhaqaaqi kartaa sharciga habraaca ee loo yaqaan due prcess oo ay ka mid tahay kulanno dhexdhexaadin iyo xallin mushkileed (Mediation and Resolution)

7. Haddii aad ku raacdo iyadoo qoraal ah qorshaha iyo meeleynta, ilmahaaga waxaa loo billaabayaa howlaha aad isla garateen ee ku xusan qorshaha. Mar walbaa oo ilmaha kale ee caadiga ah warbixinno laga bixinayo, adigana waxaad heleysaa warbixinno ah horumarka ilmahaaga marayo. Waxaad codsan kartaa in aad la kulanto kooxda hadii aad u baahato in wax laga beddelo qorshaha.

8. Kooxdu sanadkiiba mar ayey kulmeysaa si ay uga wada hadlaan horumarka ilmaha iyo si ay u qoraan qasdi cusub ama howlaha siyaadada ah ee ilmahu u baahan yahay. Waalid ahaan, waad ku raaci kartaa ama ku diidi kartaa isbedelkaa cusub. Haddaad ku diido, waa in aad iyadoo qoraal ah kula xiriirtaa.

9. Haddii aad ku raaci weydo isbedelka cusub ee qorshaha, ilmahaaga waxey horey u sii wadanayaan howlihii hore aad isku raacdeen illaa adiga iyo dugsiga isku raacdaan isbedelkan cusub. Waxyaabaha aad walwalka ka qabto, waa in aad kala hadashaa xubnaha kale ee kooxda ka mid ah. Haddii ey ku qancin waayaan, waxaad leedahay dhowr fursadood aad dooran karto. Fursadahaa waxaa ka mid ah in aad codsan karto qiimeeyn kale ama qiimeeyn madax bannaan (IEE) ama waxaad tiigsan kartaa sharciga habraaca.

10. Haddey kooxdu isku raacdo in ilmuhu u baahanyahay howsha waxbarashada gaar ahaaneed, dabadeed howshi waa sii soconeysaa. Qiimeeyn ayaa dib loogu sameynaya ilmaha sadexdii sanaba mar in aad adiga iyo dugsigaba isla garataan in ilmahu u bahneeyn qiimeeynta mooyee.

Sharciga habraaca (Due process) waxuu difaacayaa waalidka si ay cod ugu yeeshaan qorshaha waxbarashada ilmahooda iyo si ay talaabo ugu yeeshaan sida loo xalin lahaa khilaafka. Marka waalidka iyo dugsiga is khilaafo, waxey tiigsan karaan dhexdhexaadin ama codsan karaan kulan sharciga habraaca.

Dhexdhexaadinta (Mediation) waa mid degmada dugsiga iyo waalidka dooranayaan ee qof madax bannaan oo loo yaqaan dhexdhexaadiye ka caawiyo go'aan ay ku wada qanci karaan.

Kulan xallin mushkileed (Resolution meeting) waa hab cusub oo hoos yimaada sharciga waxbarashada dadka naafada ah (IDEA) ee 2004. Hamiyadiisu waa in looga wada hadlaa dacwadda sharciga habraaca iyo in la isku deyaa in shir lagu xalin karo khilaafka.

Dhageysi garqaadid madaxbannaan sharciga habraaca (Impartial due process) waa kulan dhex mara waalidka iyo degmada dugsiga. Dhinac walba waxuu soo bandhigayaa dooda ay qabaan. Qof sharci yaqaan ah ayaa dhageysanaya oo go'aan ka gaaraya howlaha waxbarasho ee ku haboon ilmaha isagoo xugsanaya sharciga.

Degmada dugsiga waa iney iyadoo koobbi qoraal ah waalidka siisaa sharciyada uu xaqa u leeyahay ee waxbarashada gaar ahaaneed ee loo yaqaan Habraaca Badbaadada. Qooraaladan waxey muujinayaan tallaabooyinka loo raaco sharciga habraaca iyo dhexdhexaadinta. Koobbi ah Habraaca Badbaadada waa in sanadkiiba mar waalidka la siiyaa. Mararka kale ee loo bahan yahay in koobbi waalidka la siyaa waa---

(a) marka ugu horeysa ee ilmaha loo garto in la qiimeeyaa ama uu waalidka codsadaa;

(b) marka ugu horeysa ee uu waalidka aqbali wayo qiimeeynta

(c) iyo marka waalidku codsado

Hadii aad u bahan tahay warbixinno siyaado ah ee ku saabsan waxbarashada gaar ahaaneed ama xuquuqda aad leedaha, waxaad wacdaa state Parent Training and Information Center or Community Parent Resource Center. Haddaadan aqoon numbarka, waxaad wacdaa ALLIANCE National Center oo ah warbixinnada lacag la'aanta ah toll-free number:

1-888-0822. Si farxad leh ayaan kuula xiriirineynaa qof ku caawiya